 broadlawns <small>MEDICAL CENTER</small> DES MOINES, IOWA	Buuga Tasmada ee Ururka oo dhan:	Maamulka Guud	
	Taariikhda Asalka:	11/1996	Nambarka.: A-1006
	Dib u eegistii/Muraajacadii ugu Danbaysay:	06/2019	Bogga 1
MAWDUUCA:	Broadlawns Community Care Program (Barnaamijka Daryeelka Bulshada) iyo Catastrophic Financial Assistance (Caawimaada Dhaqaale ee Masiibooyinka) ee Broadlawns		

I. XEERKA

Broadlawns Medical Center (Xarunta Caafimaadka ee Broadlawns) waay bixinaysaa caawimaad dhaqaale oo loogu talagalay daryeelka caafimaadka iyo daawada ana siinaayo dadka deegaanka ee danyarta ah kuwaasoo buuxsha shuruudo gaar ah ama lakulma xaalad caafimaad taasoo kureebtay masiibo dhaqaale sida kucad xeerkaan.

Xeerkaan waxaa lagu maamulaa ciwaanka “Broadlawns Community Care Program (Barnaamijka Daryeelka Bulshada) iyo Catastrophic Financial Assistance (Caawimaada Dhaqaale ee Masiibooyinka) ee Broadlawns,” waxaana loo dhaqan galinayaa sidaan soo socota:

II. UJEEADADA

Siyaasadaan waxay dajinaysaa hanaan shaqo oo ay xarunta Broadlawns Medical Center:

- (1) ku aqoonsanayso bukaanada xaqa uyeelan kara caawimaad dhaqaale.
- (2) Ay gurmada dhaqaale ugu fidinayso bukaanada kamid ah bulshada.
- (3) Ay ku bixinayso gurmada dhaqaale oo waafaqsan Code of Iowa (Xeerka Iowa) iyo siyaasada Broadlawns Community Care Program iyo hanaanada Broadlawns Medical Center.
- (4) Si ay uwaafaqdo Internal Revenue Code (Xeerka Dakhliga Gudaha) Farqadiisa 501(r) ayna uraaddo aqoonsiga canshuur dhaafka ee ururka, Broadlawns Medical Center waxay dajisay siyaasadaan waxayna kufaafin doontaa bulshada oo dhan, ayadoo lagu qorayoo luuqad kooban oo fudud, waxaana lagusoo saari doonaa luuqado badan. Waxaa intaas siidheer, ururku wuxuu websetkiisa soo galinayaa liiska dhakhaatiirta adeegyadoodu kujiraan siyaasadaan.

Broadlawns Medical Center ayaa u aqbaa karta bukaanada inuu uqalmo barnamijka Broadlawns Community Care Program bukaanasoo buuxsha shuruuda uqalmida ee hoos kuqoran oo udagsan siyaasadaan.

III. QEEXITAANADA

A. **Daganaanshaha:** Broadlawns Medical Center waxay kuqeexdaa qof deegaan ah shaqsi haysta dhalashada Maraykanka ama leh sharciga daganaanshaha wadanka kaasoo si xor ah ugu nool Gobalka Iowa kaasoo doonaya inuu kusii noolaado Degmada liiska kujirta. Qofka qasab kuma ahan inuu kunoolaado Degmada Polk muddo waqti cayiman kahor intaan loo aqoonsan qof deegaan ah.


B. **Cadadka Lacageed ee Laga Dalbaayo Shaqsiyaadka Leh Caymiska (AGB):** Qaabka soo socda ayaa loo adeegsadaan in lagu xisaabsho Cadadka Guud ee Lacagta Laga dalbaayo Shaqsiyaadka leh Caymiska.

$$AGB \% = (\text{Cadadka Guud ee dhamaan Lacagta Ay Bixinayaan Dadka Qarashka Kabaxsha Medicare} + \text{Wadarta Guud ee Lacagta Ay dhiibayaan Shirkadaha Caymiska Gaarka looleeyahay} + \text{Wadarta Guud ee Lacagta ay Dhiibayaan Dadka Qarashka Kabaxsha Medicaid} \text{ inta lagu jiro mudada hore ee } 12 \text{ ka bilood ah}) / (\text{Wadarta Guud ee Laga Baxsho Qarashaadka Guud ee Isla Caymisyadaas qaadaan}).$$

$$AGB = (\text{Qarashaadka Guud ee Lagu Baxsho Daryeelka Caafimaad ahaan Muhiimka ah ama Daryeelka Caafimaad e Degdega ah}) \times AGB\%.$$

Bokiiba AGB% ayaa la xisaabinayaa waxna laga badalayaa si sanadle ah sida kucad Lifaafa A ee siyaasadaan.

C. **Daryeelka Caafimaad ahaan Muhiimka ah:** Waa adeegyada waafaqsan baaritaanka iyo daawaynta xanuunka bukaanada, si waafaqsan heerarka udagsan shaqada wanaagsan ee caafimaadka, kuwaasoo loo baahan yahay inay haqab tiraan baahida caafimaad ee bukaanada sababna u ah wax kabaxsan dalabka bukaanada ama dookha dhakhtarka ama daryeelaha bukaanada, ahna nooca adeegga ee ugu qiimo jaban kaasoo si macquul ah ubuuxinayaa baahida bukaanada.

 broadlawns <small>MEDICAL CENTER</small> DES MOINES, IOWA	Buuga Tasmada ee Ururka oo dhan:	Maamulka Guud	
	Taariikhda Asalka:	11/1996	Nambarka.: A-1006
	Dib u eegistii/Muraajacadii ugu Danbaysay:	06/2019	Bogga 2
MAWDUUCA:	Broadlawns Community Care Program (Barnaamijka Daryeelka Bulshada) iyo Catastrophic Financial Assistance (Caawimaada Dhaqaale ee Masiibooyinka) ee Broadlawns		

D. Daryeelka Caafimaad ee Degdega ah: ida kucad Emergency Medical Treatment and Labor Act (EMTALA, Sharciga Daawaynta Caafimaad iyo Shaqaalaha), waa xaalad caafimaad taasoo leh astaamo kadhigaaya mid aad udaran taasoo hadaan lahelin gurmad caafimaad oo degdeg ah la filaayo si macquul ah inay halis xun oo caafimaad galiso qofka, kureebto naafo kutimaada shaqada, ama hawlgab daran oo kudhaca qayb kamid ah jirka ee bukaanka. Waxaa sidoo kale kujira haweeney uur leh taasoo xaaad caafimaad ay soo waajahdo.

IV. HANAANKA

A. Uqalmida Caawimaad Dhaqaale

Caawimaad dhaqaale ayaa diyaar u ah Daryeelka Caafimaad ahaan Muhiimka ah iyo Daryeelka Caafimaad ee Degdega ah lana siinaayo bukaanada buuxsha shuruudaha uqalmida caawimaad ee Broadlawns Community Care Program iyo Catastrophic Financial Assistance Programs.

B. Hanaanada Ansixinta:

Broadlawns Medical Center waxay buuxinaysaa foomka ansixinta caawimaada dhaqaale (“Foomka Ansixinta”) oo loo diyaarinaayo qofkasta oo xaq uyeesha deeqda Broadlawns Community Care Program. Foomka Ansixintu wuxuu sahayaa qorista dib u eegista maamulka iyo hanaanka ansixinta ee ay adeegsato Broadlawns Medical Center si ay ugu deeqdo bukaanada barnaamijka Broadlawns Community Care Program.

C. Kago'aan gaarista Dhaqaalaha

Qarashka guud ee qofka soo gala ayaa oo adeegsanayaa kago'aan gaarista uqalmidiisa. Xisaabinta qarashka guud ayaa lawaafajinayaa Barnaamijka Caafimaadka ee Gobolka Iowa. Dhaqaalaha soo gala dhamaan xubnaha qoyska iyo dhanacyada sharciyan masuuliyada qoyska leh ee aan kunoolayn guriga ayaa lagu xisaabinayaa hanaanka kago'aan gaarista heerarka dhaqaalaha.

Qarashka qoyska waxaa kamid ah, laakiin aan kukoobnayn, mushaaraadka iyo lacagaha shaqada laga qaato, gunooyinka naafada, gunooyinka hawlgabka iyo beeshanka, dhaqaalaha kirada kasoo xarooda, ganacsiyada saliida iyo gaaska, magdhawga shaqo la'aanta, gunooyinka VA, taageerada caruurta, lacagta aad kahesho xaaska aad isfurteen, lacagta dulsarta ah, saamiyada, magdhawga shaqaalaha, lacagaha tabarucaada ah, iyo qarashaadka kale.

Lacagaha tabarucaada ah waa ilaha dhaqaale/gunooyinka agu baxsho bilaa shuruuda. Qiimo macquul ah ayaa lasiinayaa ilahaas/gunooyinkaas ayadoo laga baaraan dagaayo dhamaan sababaha laxariira.


Deeqaha cuntada waa laga saaraa waxyaabaha lagu qiimaynaayo go'aaminta uqalmida caawimaada.

Codsadayaasha hela qarashaadka iskudhafka ah ee kahooseeya ama udhiga xadiyada ucayiman dhaqaalaha ayaa xaq uyeelanaaya caawimaada Broadlawns Community Care Program.

Xisaabinta Qarashka: Marka laga hadlo dadka waawayn, erayga “Qarashka Guud Sanadkiiba” oo kujira Codsiga Caawimaada waxaa looga jeedaa wadarta guud ee qarashka guud ee qofka soogala sanadkii (“dhaqaale”) ee bukaan kasta ama xaaska bukaanka. Hadii bukaanku caruur yahay, erayga “Qarashka Guud Sanadkiiba” oo kujira Codsiga Caawimaada Broadlawns waxaa looga jeedaa Qarashka kayimaada bukaanka, hooyada bukaanka iyo aabaha bukaanka.

D. Shaxda Xadiga Udagsan Dhaqaalaha

Broadlawns Medical Center ayaa u aqoonsan karta dhamaan bukaanada qarashkoodu, sida lagu go'aanshay hanaanka waafaqsan Codsiga Caawimaada ee Broadlawns, uu kayaryahay ama udhigmo 400% xadiyadan ucayiman heerka fakhriiga kaaso sanad kasta lagusoo daabaco Diiwaanka Federaalka ayna soo daabacdo U.S. Department of Health and Human Services (Waxda Maraykanka Uqaabilsan Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka) (“Tusmooyinka Dhaqaalaha ee Heerka Fakhriiga Federaalka”) inay yihiin kuwo uqalma barnaamijka Broadlawns Community Care Program, ayadoo aaminaysa in shuruuda uqalmida ee kuqoran meel kale oo siyaadaan kamid ah in labuuxshay.

 broadlawns MEDICAL CENTER DES MOINES, IOWA	Buuga Tasmada ee Ururka oo dhan:	Maamulka Guud	
	Taariikhda Asalka:	11/1996	Nambarka.: A-1006
	Dib u eegistii/Muraajacadii ugu Danbaysay:	06/2019	Bogga 3
MAWDUUCA:	Broadlawns Community Care Program (Barnaamijka Daryeelka Bulshada) iyo Catastrophic Financial Assistance (Caawimaada Dhaqaale ee Masiibooyinka) ee Broadlawns		

Daryeelka Deeqda Dhamaystiran ah ayaa lasiinayaa bukaanada xaqa uyeesha ee aan haysan caymiska kufilan ama aanba lahayn wax caymis ah kuwaasoo hela qarash dhan 300% ama kayar Heerarka Udagsan Fakhriiga Dhaqaale ee Federaalka.

Bukaanada uqalma ee aan caymiska lahayn aa caymis kufilan aan lahayn ee qaata qarash udhaxeeya 301% iyo 400% ee Tusmooyinka Udagsan Heerarka Fakhriiga Dhaqaale ee Federaalka, waxaa loo samaynayaa qiimo dhimis si loo yareeyo waajibaadka qarash bixin ee saaran bukaanka oo laga jaraayo baaqiga lacageed ee kujirta koontada bukaanka kadib marka laga jaro boqolkiiba qiima dhimista uu xaqa uleeyahay bukaanku ee kuqoran shaxda hoose:

Qiima dhimis %	Tusmooyinka Heerka Fakhriiga Dhaqaale ee heer Federaal ee udagsan Tirada Qoyska
100%	Dhaqaalaha qoyska ayaa kayar ama le'eg 300% cadadka FPIG
AGB kaliya	Dhaqaalaha qoyska ayaa ah 301% ilaa 400% cadadka FPIG

Bukaanada aan lahayn caymiska kuwaasoo haysta dhaqaal udhaxeeya 133% iyo 400% heerka Tusmooyinka Fakhriiga Dhaqaale ee Federaalka kuna guuldaraysta inay iskaqoraan Suuqa Isdhaafsigaa Caymiska ee Iowa kahor intaysan dhamaan mudada udagsan isdiiwaangalinta ayaa xaq uyeelanaaya caymiskaan, laakiin waxaa laga doonayaa inay isdiiwaangaliyaan mudada soosocota ee isdiiwaangalinta. Inay kuguul daraystaan isdiiwaangalinta mudada diiwanagalinta ee soo socota waxay keeni kartaa inay xaq uyeelan waayaan caawimaada. Shaqsiyaadka lumiya caawimaad sabab laxariirta inay bixin waayeen lacagta joogtada ah ee Suuqa Isdhaafsigaa Caymiska ee Iowa xaq uma yeelanayaan barnaamijkaan.

Caymiskaan waxaa kujira qarashaadka laga jaro bukaanka. Kuma jiraan qiima dhimisyada lagu baxsho xeerka A-1015 Qiima Dhimisyada Dadka Qarashka Iskadhiiba ee dadka lacagta Dhakhsada Udhiiba.

BMC waxay kaadhaafi kartaa ama dhimi kartaa lacagaha lagu jarto caymiska qaybta lagaa baxsho ee Medicare iyo Medicaid kaliya markay jirto baahi dhaqaale hadii labuuxsho shuruudaha soo socda:

- Qarash dhaafka ama qiimo dhimista waa inaan laxayyiisiin. (Waa wax wanaagsan in lagu waaniyo bukaanada si shaqsi ah inay jiraan qarash dhaaf lagu bixinaayo qarashka wadaaga ah ama lacagaha laga jarto qofka caymiska kujira markay jirto baahi dhaqaale bukaankuna uu gunooyinka noocaas ah codsan karo waqtiga ama isla markaba kahor intaan daawada lasiin.)
- Qiima dhimista si joogto ah ooma baxsho, laakiin waxaa kaliya lasiiyaa bukaanada baahida dhaqaale qaba ee doonaaya inay codsadaan.


Bukaanada caymiska leh ee buuxsha shuruudaha caawimaada dhaqaale ayaa laga dhimi karaa cadad lacagaha waajibka ku ah inay kadhiibaan qaybta ugasoo aada caymiska ama lacagaha looga jarto caymiska si waafaqsan xeerkaan.

Bukaanada aan xaq uyeelan caawimaad dhaqaale oo lagu baxsho Caymiska Broadlawns Community Care ayaa xaq uyeelan kara caawimaada lagu baxsho Broadlawns Catastrophic Financial Assistance, ayadoo loo qaadanaayo in shardiga qabanaaya meel kale oo kamid ah xeerkaan labuuxshay.

E. Xaqiijinta Dhaqaalaha:

Broadlawns Medical Center ayaa codsan doonta in bukaanku keeno cadaynta qarashka soo gala.

- Dukumiiintiyada Xaqiijinaaya Dhaqaalaha:** Dhaqaalaha waxaa lagu xaqiijin karaa mid kamid ah qaababka soosocda: Foomka IRS W-2, Cadaynta Mushaarka iyo Lacagta aad hesho; Risiidka Jeega Mushaarka; Cnshuur Celinada; Social Security, Magadhawga Shaqaalaha, ama Waraaqaha Kago'aan gaarista Magdhawga Shaqo La'aanta; in Taleefanka uu kuxaqiijiyo qofka uu ushaqeeyo qarashka guud ee bukanka soogala; ama cadaynta bangiga. Hadaan bukaanku wali keenin dukumiintigaan, Broadlawns Medical Center ayaa bukaanka udiraysa waraaq ay uga dalbanayso dukumiintiga.

 broadlawns <small>MEDICAL CENTER</small> DES MOINES, IOWA	Buuga Tasmada ee Ururka oo dhan:	Maamulka Guud	
	Taariikhda Asalka:	11/1996	Nambarka.: A-1006
	Dib u eegistii/Muraajacadii ugu Danbaysay:	06/2019	Bogga 4
MAWDUUCA:	Broadlawns Community Care Program (Barnaamijka Daryeelka Bulshada) iyo Catastrophic Financial Assistance (Caawimaada Dhaqaale ee Masiibooyinka) ee Broadlawns		

- ii. **Dukumiinti aan Laheli Karin:** Hadii uusan bukaanku awoodin inuu keeno dukumiinti cadaynaaya qarashka soo gaa, Broadlawns Medical Center ayaa cadayn uraadin karta qarashka soo gaa bukaanka (i) ayadoo kacodsanaysa bukaanku inuu saxiixo codsiga caawimaada oo lagu cadaynaayo dhab ahaanta macluumaadka dhaqaale oo uu baxshay iyo/ama hanaanka kabaxsan bukaanka ee lagu cadaynaayo qarashka oo ay damiin katahay Broadlawns Medical Center ayadoo adeegsanaysa qandaraasle ay ansixiyeen Gudigu, ama (ii) ayadoo adeegsanaysa cadaynta qoran ee shaqaalaha Broadlawns Medical Center ee buuxinaaya Codsiga Caawimaada taasoo sheegaysa in bukaanku si hadal ah uu kuxaqiijiyay xisaabinta dhaqaalaha ee Broadlawns Medical Center. Markay jiraan xaalado uusan bukaanku awoodin inuu keeno dukumiintiga laga rabo si loo xaqiijiyay dhaqaalaha soogala, Broadlawns Medical Center ayaa doonayso in bukaanku sharaxaad kabaxsho sababta uusan u awoodin inuu keeno dukumiintiga laga doonayo.
- iii. **Kala saarida adaynta Qarashka ee aan Wali Lashaacin:** Inta lagu jiro hanaan cadaynta, inta Broadlawns Medical Center ay soo aruurinayso macluumaadka muhimka u ah go'aaminta cadadka Qarashka soogala bukaanka iyo sidoo kale shuruudaha kale ee uqalmida, bukaanka waxaa loo aqoonsan karaa bukaan si gaar ah qarashka iskaga dhiibaaya si waafaqsan xeerarka Broadlawns Medical Center.

F. Uqalmida Iskamuqata

Bukaanada buuxiya shuruuda uqalmida ismuuqata ee qaybtaan kujirta ayaa lasiin karaa caawimaad dhaqaale ayagoon buuxin codsiga caawimaada dhaqaale. Dukumiintiyada taageeraaya uqalmida bukaanka ama kaqaybgalka barnaamij kuqoran hoos waa in lakeenaa laguna daraa faylka bukaanka.

- i. Uqalmida iskamuqata waxaa lagu go'aamin karaa xaaladaha nololaha qofku kujiro kuwaasoo ay kamid ahaan karaan:
 - a. Uqalmida Tabarucaada Cuntada
 - b. Inuu qayb kayahay qofku Women, Infants and Children programs (WIC, Barnaamijka Haweenka, Dhalaanka iyo Caruurta)
 - c. Barnaamijka qadada qiimaha jaban ee dugsiga
 - d. Uqalmida barnamijyada kale ee caawimaada gobalka ama kuwa maxaliga ah
 - e. Qof hooy a'aan ah ama qof daryeel kahelay hooyga dadka hooy la'aanta aha ama xarun caafimaad oo bilaash ah
 - f. Bukaanka dhinta asagoon lahayn wax hanti ah


G. Shaqaalaha Barnaamijka

Financial Counseling Department (Waaxda Talo bixinta Dhaqalaha) ayaa maamulaysa Broadlawns Community Care Program. Kormeeraha ayaa shaqaalaysiinaaya shaqaalaha loo baahan yahay si ay qaab hufan uga shaqeeyaan Barnaamijka. Kormeeraha ayaa xaqiijinaaya in shaqaale kasta oo amarkiisa kushaqeeya uu yahay mid karti iyo aqoon uleh dhaan arimaha quseeya Broadlawns Community Care Program iyo sidoo kale barnamijyada ay baxshaan wakaaladaha Gobalka iyo kuwa Federaalka si loosiyo daryeelka isbitaalka iyo caafimaadka bukaanada xaqa ueh.

Muddo ugu yaraan dhan todobo (7) sano laga bilaabo taariikhda uu bukaanku codsiga gudbisto, Broadlawns Medical Center ayaa haynaysa dukumiintiyada kufian in lagu aqoonsado bukaan kasta oo lasiiyay aqoonsiga ah inuu xaq uleeyahay barnaamijka Broadlawns Community Care Program, Dhaqaalaha soo gala bukaanka, qaabka loo xaqiijiyay dhaqaalaha bukaanka iyo qofka ansixiyay siinta bukaanka aqoonsiga uu uhelaayo uqalmida caawimaada Broadlawns Community Care Program.

H. Takoor la'aanta

Shaqaalaha loo xilsaaro waxay aqbalayaan ayna kashaqaynayaan dhamaan codsiyada uqalmida ee ay soodirsadaan dadka danyarta ah ee kudhaqan Degmada Polk. Majiri doonaan wax takoor ah lagu samaynaayo shaqada xeerarka laxariira uqalmida ama bixinta daryeelka caafimaad laguna takooro qofka sabab laxariirta isirka, midabka, caqiido, diin, jinsi, da', naafo ama wadanka uu kasoo jeedo.

 broadlawns <small>MEDICAL CENTER</small> DES MOINES, IOWA	Buuga Tasmada ee Ururka oo dhan:	Maamulka Guud	
	Taariikhda Asalka:	11/1996	Nambarka.: A-1006
	Dib u eegistii/Muraajacadii ugu Danbaysay:	06/2019	Bogga 5
MAWDUUCA:	Broadlawns Community Care Program (Barnaamijka Daryeelka Bulshada) iyo Catastrophic Financial Assistance (Caawimaada Dhaqaale ee Masiibooyinka) ee Broadlawns		

I. Adeeg bixiyaasha Waajibka lasaaray

Gunooyinka barnaamijkaan waxaa **kaliya** lagu bixinayaa Broadlawns Medical Center; qarashaadka lasiiyo adeeg bixiyaasha kale, isbitaalada, farmashiyaasha, ama xirfad layaashu waa **xaaraan**, ilaa in si gaar ah loogu fasaxo maahee qaybo kale oo xeerkaan kamid ah.

J. Gunooyinka Isla Kooxda/Qolol sadexaad

Broadlawns Community Care Program and Catastrophic Financial Assistance ayaa bixinaaya gunooyinka kaliya inay noqdaan damaanada ugu danbaysa; midkasta iyo dhaman caymisyada kale waxaa rasmiyan iskaleh barnaamijkaan. Codsade xaq uma yeelanaayo gunooyinka barnaamijka marka laga saaro ama uu uqalmi waayo ilaha kae ee qolyaha sadexaad baxshaan sabab laxariirta khiyaano ama xad gudub.

K. Dad aan lahayn caymis kufilan/aan lahayn caymis

Bukaanada kudhaqan Degmada Polk oo katirsan Medicaid ama urur baxsha Daryeel y maamusho Medicaid o ah ishooda ugu wayn maalgalinta ama aanba lahayn wax caymis ay ayaa xaq uyeelan kara Broadlawns Community Care Program. Bukaanada leh caymisyadaan ayaa loo aqoonsaday inay yihiin dad danyar ah sida kucad tusmooyinka dhaqaalaha iyo ilaha qarashka ee Gobalka Iowa.

L. Codsiga/Ogaysiiska

Codsiga gunooyinka isbitaalka ee lagu baxsho Barnaamijkaan ayaa la aqbalayaa inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee shaqada ee Xafiiska Talo Bixinta Dhaqaalaha oo kudhex yaala Broadlawns Medical Center.

Xeerarka iyo qawaaniin ayaa loodiyaarinayaa si horayba looga go'aansho uqalmida bukaanka. Codsadaha waxaa qoraal ahaan loogusoo sheegayaa ansixinta ama diidmada. Ogaysiisyada diidmada waxaa lasoo raacinayaa sababaha qofku ugu qalmi waayay.

Broadlawns Medical Center ayaa codsan doonta in bukaan kasta oo codsanaaya Broadlawns Community Care Program ama Catastrophic Financial Assistance uu buuxsho foomka codsiga (“Cosiga Caawimaada ee Broadlawns”). Codsiga caawimaadu wuxuu sahlayaa in lasoo aruursho macluumaadka si waafaqsan Xeerka Iowa iyo sidoo kale macluumaadka lagu go'aaminaayo uqalmida barnaamijyada aan ka ahayn Broadlawns Community Care Program iyo Catastrophic Financial Assistance. Hadaan bukaanku buuxin shuruuda uqalmida, bukaanka ayaa waayi kara uqalmida barnaamijkaan.

M. Codsiga Dib U eegista

Hadii ladiido codsiga codsadhaha gunooyinka lagu baxsho Broadlawns Community Care Program, wuxuu codsaduho xaq uleeyahay inuu racfaan kaqaato go'aankaas uuna ugudbiyo Kormeeraha Talo Bixinta Dhaqaalaha. Codsaduho wuxuu ubaahan doonaa inuu racfaanka kucodsdo qoraal ahaan asagoo udiraaya Kormeeraha Tao bixinta ee Dhaqaalaha muddo 10 maalmood ah gudahood laga bilaabo taariikhda diidmadu soobaxdo.


N. Kuguul daraysiga Wada shaqaynta

Codsadaha ayaa masuul ka ah bixinta dhamaan macluumaadka laga dalbado kaasoo loo arko inuu muhiim u yahay xeerkaan uuna codsado lataliyuhu muddo 30 maalmood ah gudahood marka codsiga uu gudbiyo; kuguul daraysiga keenista macluumaadka laga dalbado mudada loo cayimay gudaheed waxay keenaysaa inaan codsiga dhamaystirmin waxayna sababaysaa in ladiido codsiga.

Kuguul daraysiga codsaduho kuguul daraysto inuu raaco, qaab kasta, dhamaan codsiyada loo dirayaa barnaamijyada kale ee federaalka, gobalka, degmada, ama barnaamijyada kale ee caawimaada kuwaasoo ay suuragal tahay inuu uqalmo una noqon lahaa muhiim Barnaamijkaan waxay keenaysaa in codsigiisa ladiido.

Wax isdaba marin kasta oo lagu sameeyo xaqiiqooyinka oo uu sameeyo codsaduho si uu ugu qalmo Barnaamijkaan waxay keenaysaa in codsigiisa ladiido, ayna kujirto in ladiido caymis kasta oo uu horay uqaadan jiray.

Been abuurista macluumaadku waxay keenaysaa diidmada caawimaada barnaamijka. Hadii, kadib marka bukaanka lasiiyo uqalmiga barnaamijka Broadlawns Community Care Program ayna ogaato Broadlawns Medical Center in macluumaadka lagu sheegay codsiga caawimaada uu been ahaa, caawimaada dhaqaale waa laga saarayaa qofka ayadoo lagasoo bilaabay markii loo bilaabay caawimaada iyo/ama xiliga la ogaado been abuurka.

 broadlawns <small>MEDICAL CENTER</small> DES MOINES, IOWA	Buuga Tasmada ee Ururka oo dhan:	Maamulka Guud	
	Taariikhda Asalka:	11/1996	Nambarka.: A-1006
	Dib u eegistii/Muraajacadii ugu Danbaysay:	06/2019	Bogga 6
MAWDUUCA:	Broadlawns Community Care Program (Barnaamijka Daryeelka Bulshada) iyo Catastrophic Financial Assistance (Caawimaada Dhaqaale ee Masiibooyinka) ee Broadlawns		

O. Mudada Uqalmida

Ansixinta gunooyinka lagu baxsho Barnaamijkaan kama badan doonto labo iyo toban bilood. Mudada ay soconayaan gunooyinka qofka lasiinaayo waxay kujaan go'antahay xaaladaha dhaqaale iyo kuwa caafimaad ee codsadaha. Balaarinta gunooyinka ayaa diyaar ah marka la go'aansho in shuruudaha uqalmida labuuxshay ayadoo laraacaayo macluumaad soo kordhay. Barnaamijka ayaa xaq uleh inuu dib uqiimayn kusameeyo uqalmida codsadaha hadii isbadal kuyimaado dhaqaalihii qofku heli jiray inta lagu jiro mudada uqalmida. Waxaa intaas siidheer, wuxuu barnaamijku xaq uleeyahay inuu dib uqiimayn kusameeyo uqalmida codsadaha marka qofku ubaahdo in isbital laseexsho si loo go'aansho in qofka adeegga helaaya uu xaq uleeyahay iyo inkale barnaamijyo ka.

P. Daryeelka Indhaha/Ookiyaalaha Indhaha ee Broadlawns Medical Center

Broadlawns Medical Center ayaa bixinayso caawimaad dhaqaale oo dhanka daryeelka ookiyaalaha indhaha ah lana siinaayo dadka deegaanka ee danyarta ah buuxshana shuruudo gaar ah sida kuqeeqan barnaamijka Broadlawns Community Care Program... (Waxaa caawimaadaan kareeban qofkasta oon buuxin shuruudaha cadaynaaya inuu yahay Qof Deegaan U ah Degmada Polk.)

Q. Codsadayaasha Xaqa Uyeesha

Kaliya dadka dagan Degmada Polk kuwaasoo buuxsha shuruudaha dhaqalaaha, ilaha, daganaanshaha iyo caafimaadka ee ay dajiyaan Gudigga Kasocda Waaxaha ayaa xaq uyeelan kara gunooyinka lagu baxsho Tusmooyinka Broadlawns Community Care Program.

Tirinta xubnaha rasmiga ah ee qoyska ayaa loobaahan yahay. Bukaanaada codsanaaya caawimaada barnaamijkaan uu baxsho waxaa laga doonayaa inay keenaan cadaynta tirada dadka kunol guriga bukaanka.

Tirinta tirada xubnaha guriga kunool si loo hubiyo in qofka wayn uqalmo caawimaada ayaa lawaafajinayaa shuruuda Medicaid ee Gobalka Iowa. Broadlawns Medical Center waxay kusoo daraysaa xisaabinta bukaanka, xaaska bukaanka iyo dadka kale ee sharciyan bukaanka kutiirsan.

Tirinta tirada xubnaha guriga kunool si loo hubiyo in ilmaha yar uqalmo caawimaada ayaa lawaafajinayaa shuruuda Medicaid ee Gobalka Iowa. Broadlawns Medical Center waxay kusoo daraysaa tirada bukaanka, hooyada bukaanka iyo qof kasta oo kale oo kutiirsan hooyada bukaanka, iyo aabaha bukaanka iyo qofkasta oo uu masuul kayahay aabaha bukaanku.

Bukaanada dhinta ee aan lahayn wax hanti ah waxaa loo aqoonsan karaa inaysan haysan wax qarash ah marka laxisaabinaayo qarashka Broadlawns Medical Center. Keenista dukuiintiyada dhaqaalaha lagama doonaayo bukaanada dhinta ee aan wax hanti ah katagin.

Xubin katirsan qoyska ayaa laga dooni karaa inuu codsado deeqo kale oo maaliyadeed asagoo wakiil ka ah bukaanka dhintay kahor intuuusan uqalmin caawimaada Broadlawns Community Care Program.


Inta lagu jiro hanaanka xaqiijinta marka codsaduho uu baahi uqabo daawooyin looqoraayo, waxaa bukaanka lasiinayaa dookhyo sida Caawimaad Guud oo uu kahelo Department of Community Family & Youth (Waaxda Bulshada, Qoyska iyo Dhalin yaraha). Macaamiisha ayaa heli kara muddo kooban oo ay uqalmaan caawimaada taasoo dhan ilaa 15 maalmood lagasoo bilaabo codsiga koobaad.

Dhamaan bukaanada kayar da'da 19 waa inay codsadaan Title XIX ama barnaamijka Healthy and Well Kids of Iowa (Hawk-I, Caruur Caafimaad iyo Fayaqab leh ee Iowa) si loogu aqoonsado inay uqalmaan barnaamijka Broadlawns Community Care Program. Diidmada dhiibista qarashaadka joogtada ah ee barnaamijka Hawk-I lama ogolaan doono sabab laxariira uqalmida barnaamijka Broadlawns Community Care Program.

Waa masuuliyad saaran codsadaha inuu soo sheego isbadal kasta iyo dhamaan isbadalada kudhaca dhaqaalaha qoyska iyo xaaladiisa caymis muddo 10 maalmood ah gudahood

R. Daganaanshaha

Dadka buuxsha sharciga daganaanshaha ee Degmada Polk sida uu ugu qoran yahay xeerkaan ayaa ah kuwo xaq uleh caawimaad dhaqaale.

 broadlawns MEDICAL CENTER DES MOINES, IOWA	Buuga Tasmada ee Ururka oo dhan:	Maamulka Guud	
	Taariikhda Asalka:	11/1996	Nambarka.: A-1006
	Dib u eegistii/Muraajacadii ugu Danbaysay:	06/2019	Bogga 7
MAWDUUCA:	Broadlawns Community Care Program (Barnaamijka Daryeelka Bulshada) iyo Catastrophic Financial Assistance (Caawimaada Dhaqaale ee Masiibooyinka) ee Broadlawns		

S. Ilaaha

Broadlawns Medical Center waxay raacaysaa Barnaamijka Medicaid ee Gobalka Iowa si ay ugo'aamiso xadiyada udagsan uqalmida caawimaada Broadlawns Community Care Program iyo Catastrophic Financial Assistance.

T. Broadlawns Catastrophic Financial Assistance (Gurmada Dhaqaale ee Masiibooyinka ee Broadlawns)

Hadii qarashaadka guud ee laga qaadaayo bukaanka mudo 90-maalmood ah ay kabataan 10% qarashka guud ee qoyska soogala sanadkiiba, baaqiga lagu leeyahay m=bukaanka ayaa la dhmi karaa ilaa 10% cabirka qarashka guud ee qoyska soogala sanadkii baaqiga sooharana waxaa lagu dabaqayaa hanaanka qarash bixinta tartiibta ah ayadoo loomaraayo waaxda Talo bixinta Dhaqaalaha ee BMC.

Hadii qoysku haysto wax kabadan \$10,000 oo hantida guurguurta ah bukaanku xaq uma laha caawimaada Catastrophic Financial Assistance asaga ayaana masuul ka ah inu dhiibo qarashka baaqiga laga doonaayo inuu dhiibo.

U. Daawooyinka Dhakhtarku qoro

Broadlawns Community Care Program ayaa siinaaya daawooyinka dhakhtarku qoro bukaanada xaq uleh barnaamijka ayadoo lagu siinaayo xadiyo kuqeehan halkaan hoose.

1. Daawooyinka dhakhtarku qoro ee aan kabadnayn cadad kufilan hal wareeg oo 30 maalmood ah aana kabadnayn mudada ay kudhacayso uqalmida caawimaadu.
2. Daawada bukaanka loo qoraayo waxay kujirtaa hanaanka daawada ee Broadlawns Community Care Program.
3. Daawo uu qoray dhakhtar ogolaansho kahaysta Broadlawns Community Care Program.
4. Bukaan jiiifka/kormeerka bukaanada:
Dadka kudhaqan Degmada Polk ee aan caymiska lahayn oo sugaaya Xubinimada Dookha Barta Suuqa Iowa ama Caafimaadka iyo Fayaqabka Iowa ayaa lasiinayaa daawooyin kufilan 10 maalmood.
Dadka aan daganayn Degmada Polk ee aan caymis lahayn waxay ubaahan yihiin inuu qarash dhaaf usameeyo Madaxa Hogaanka Caafimaadka
5. Bukaan socodka/bukaanada yimaada xarunta caafimaadka ee codsigooda aysan wali go'aan kagaarin Community Care ayaa xaq uyeelanaaya daawooyinka farmashiyaha Broadlawns muddo 15 maalmood ah laga bilaabo maalinta codsiga ay dirsadaan.

V. Qalabka Maguuraanka ah ee Caafimaadka (DME)

deegyadaan waxaa kaliya ugu baxshaa barnaamijkaan markuu baxsho dhakhtar ogolaansho kahaysta barnaamijka oo kadhax shaqeeya Broadlawns Medical Center.

W. Adeegyada aan laga bixin Bukaanka

Broadlawns Medical Center waxay xaq uleedahay adeegyada lagu bixinaayo xeerka barnaamijka Broadlawns Community Care Program.

X. Wax Saamayn ah Kuma Lahan Xeerarka Isbitaalada kale

Xeerkaan caawimaadu waa inuusan waxyeelayn ama wax kabadalin xeerarka kale ee laxariira dadaalada ay qarashka ku aruursanayaan ee ka imaanaaya adeeg bixiyaasha sadexaad, wareejinada bukaanka, ama daryeelka degdega ah.

Y. Isbadalada

Gudiga Agaasimayaashu waa inay ansixiyaan isbadalo kasta oo lagu samaynaayo xeerarka udagsan xeerkaan kahor intaan la dhacay galin.

Waxaa Ansixiyay Gudiga Agaasimayaasha bishii Juun 18, 2019.